



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Maarso 14, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka  
Ujeedada: Bogga internet-ka oo cusub oo loogu talagalay fursadaha maalgelineed ee Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon wuxuu dejinayaa fursado maalgelineed oo leh qiyaastii \$300 milyan oo ah maalgelinta la isku daray ee Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka (ARPA) oo la waafajiyay Maalgelinta Guud ee Oregon. Fursadahani maalgelineed ee mashruuca ARPA waxay diiradda saarayaan baahiyaha ka soo kabashada COVID-19 iyo ballaarinta awooda guriga iyo goobaha bulshada ku saleysan kaasi oo ah hab loo siman yahay oo waafaqsan [Warbixinta North Star ee ODDS ee ku saabsan Sinnaanta](#).

ODDS waxa leedahay [bogga internet-ka oo cusub](#) oo wata macluumaad ku saabsan fursadaha maalgelineed ee ARPA. Marka deeqda lacageed u furan tahay codsiyada, faahfaahin ayaa lagu soo qori doonaa bogga internet-ka. Waxaa jira macluumaad ku saabsan lacagaha deeqda ah oo dhawaan soo socda iyo qorshaha mashruuc ay ku qoran yihiin dhammaan fursaduhu. Boggan internet-ka si joogta ah ayaa loo cusbooneysiin doonaa.

Ku dhawaaqida deeqdayadii lacageed uu horreysay ayaa dhawaan soo socota. Ilaa taasi laga gaarayo, waxaa jirta fursad lagu bixinayo jawaab celin ku saabsan fursada maalgelineed si loo xoojiyo isku-doodista ka jirta Oregon ee ku qoran [bogga internet-ka](#).

Waxa aan rajeynayaa in aad boggan internet-ka la wadaagi doonto qof kasta oo daneynaya. Waanu kula soo socod siin doonaa marka deeqda lacaeed loo furo codsiyada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).